

"Jaamacadda Washington (University of Washington, UW) wuxuu ahaa dugsi dhan walba leh oo aan iga dhigin inaan danahayga ka doorto midba midka kale. Waxaan helay fursad, dhiirigalin iyo deegaan machad weyn — iyo bulsho isku xiran ee ka mid ah mid yar."

Julia Jannon-Shields, '21  
Santa Clara, CA  
Isgaarsiinta iyo CEP  
(bulshada, deegaanka iyo qorsheynta)



Ammara Touch, '21  
Kent, WA  
Daraasadka Bayoolajiga  
iyo qowmiyadaha Mar-  
eykanka

Letauaeletise Hunkin, '23  
Spanaway, WA  
Daraasadaha qoomiyada-  
ha Maraykanka iyo cilmiga  
dhaqamada dadka



"Bulshadayda ayaa i heshay! Ardayda ka socota Isbahaysiga Ardayga Polynesian ayaa ku wareegay agagaarka jaamacadda inta lagu guda jiro maalmaha ku biiritaanka oo aad bay ii daryeeleen. Hadda iyaga waa qaar ka mid ah saaxiibadayda ugu fiican."

"Waan ogaa in UW uu ii yahay go'aanka saxda ah sababtoo ah sida loogu wada dhan yahay, sida ay ii soo dhawaysay aniga oo keliya maaha laakiin qoyskayga. Waxay hooyaday ku soo dhawaysay Isbaanish — luuqadeeda. Kuma qasabanayn inaan turjumo."



Rosario Ocampo, '22  
Mt. Vernon, WA  
Cilmiga siyaasadda  
iyo falsafada

## IYAGOO ADEEGSANAYA EREYADOODA

### SAFIIRADA ARDAYDA EE WACYIGALINTA IYO SHAQAALAYNTA DHAQAMADA KALA DUWAN (MULTICULTURAL OUTREACH & RECRUITMENT, MOR)

Andy V. Manzano, '23  
Palmdale, CA  
Maareynta ganacsiga  
iyo kala duwanaanta



"Runtii wax fikrad ah kama hayn sida — ama haddii — aan awood u yeelan lahaa inaan bixiyo waxbarashadayda sare. Waxaas oo dhami waxay is beddeleen maallintii shaqaalaha MOR ee yaabka leh ay ii dhiibeen buugayga deeqda waxbarasho ee shakhsi ahaaneed."

"Waraysiyadii shaqo ee ay ila yeesheen shirkadaha, waraystayaasha waxay la yaabeen inta khibrad ee aan ku helay koorasyada aan ka dhigtay UW."

Tina Nguyen, '22  
Seattle, WA  
cilmiga macluumaadka  
iyo cilmi nafsiga



Jordan Crawford (Kuskokwim), '21  
Black Diamond, WA  
Maareynta ganacsiga (suuq-geyn)



Mehilet Abraha, '23  
Shoreline, WA  
Maareynta shaqaalaha  
iyo nidaamyada  
macluumaadka



Favian Mares, '22  
Toppenish, WA  
Waxbarashada,  
bulshooyinka iyo  
ururada





KU KALSOONOOW RIYOORYINKAAGA.  
WAAN SAMEYNAA.





# KA DHIG RIYOORYINKAAGA KUWA RUN AH

Waan ognahay inaad leedahay riyooyin waaweyn oo aad ku dadaalayso inaad ku guulaysato. Markaad ka fekereyso nolosha ka dib dugsiga sare, waxaan kugu martiqaadeynaa inaad wax ka barato University of Washington, halkaas oo riyooyinkaas ay ku rumoobaan.

Kooxda Wacyigalinta iyo Shaqaalaysiinta ee Dhaqamada Kala Duwan (Multicultural Outreach & Recruitment, MOR) ayaa halkan u jooga inay noqdaan iskaashatadaada iyo dhiirigaliyahaaga ugu weyn. Maantaba la xiriira la taliyayaasheena qaabilaadda MOR. Waxay diyaar u yihiin inay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan habka codsiga, gargaarka maaliyadeed iyo wixii ka baxsan. Marka aad si rasmi ah u noqoto Husky, Xafiiska Arrimaha Dadka laga tirada badan yahay iyo Kala duwanaanshiyaha (Office of Minority Affairs & Diversity) ayaa lagu maalgeliyay guushaada, illaa dariiqa qalinjabinta.

Aad ayaan ugu faraxsanahay mustaqbalkaaga — mana sugi karno inaan UW ka dhigno qayb safarkaaga ah. Nagu soo biir.

# W

UNIVERSITY of WASHINGTON

## MULTICULTURAL OUTREACH & RECRUITMENT

Office of Minority Affairs & Diversity

University of Washington  
Multicultural Outreach & Recruitment  
Box 355845  
Seattle, WA 98195

(206) 221-6463

reach@uw.edu

depts.washington.edu/reach

 @uwmor

 @uwomadmor


 @uwmor

“

Aadida kulliyadda waxay albaabada u furaysaa fursadaha aan waligeed loo heli karin goys soo-galooti ah oo dakhligoodu yar yahay. Waxaan u imid UW sababtoo ah waxay bixisay dhammaan barnaamijyada aan xiisaynayo – iyo kaalmada dhaqaale ee ugu badan.

”

Favian Mares, '22  
Toppenish, WA  
Waxbarashada,  
bulshooyinka iyo ururada





# KU DHIIRO INAAD RIYOOTO

## AAN KULEEJKA KA DHIGNO MID FUDUD

Haddii aad hadda bilowday inaad ka fikirto ama aad hore u heshay kuleejka riyadaada, waxaan helnaa inay adagtahay. Marka waa kan ballankeena: Meel kasta oo aad safarkaaga kaga jirto, waana kugu hagi doonaa oo kugu caawin doonaa sidii ay kuugu shaqayn lahayd. Waxaad ka tirsan tahay Jaamacadda Washington (University of Washington, UW) — waxaana rabnaa inaan kugu aragno halkan.

## UW ADIGA AYAA LAGUUGU TALAGALAY

Laga soo bilaabo Puget Sound illaa Spokane, Bellingham illaa Walla Walla iyo wixii ka xageeya, UW waxay ku faantaa inay jaamacad u noqoto dhammaan dadka ka soo jeeda Washington. Ina lagu jiray 2020, waxaanu soo dhawaynay tiro arday cusub ah oo ka yimid bulshooyinka tirada yar — oo ay ku jiraan qaar badan oo ay tahay markii ugu horeysay oo qof ka mid ah qoysaskooda galo jaamacad afar sano la dhigto. Qoyskayaga weyn ee Husky, ee kala duwan ayaa boos kuu haya.

29%

Husky-ga jooga UW waa ardayda jilka kowaad ee kulliyadda.

70%

Ardayda UW waxaa la shaqaaleysiiyaa lix bilood gudahooda markay qalin jebiyaan.

W

## DHANKA KHADKA DHAMMAADKA

Taageeradeena ma dhammaanayso marka aad hesho warqadda codsiga. Arday badan oo ka socda kooxaha aan la matalin ayaa ka qalin jabiyay jaamacadda UW ee Seattle oo ka badan kuwa machadyada dadweynaha ee kale ee afarta sano la dhigto ee Washington. Waanu ku faraxsanahay inaan aragno inaad bilawdo xirfadaada oo aad wax ka badasho aduunka, waxaanan rabnaa inaan hubino in shaqadaada adag ay faa'iido leedahay.

*Kooxaha aan la matalin waxaa ka mid ah ardayda midabka leh (Hindida Ameerikaanka/Dhalad Alaska, Madaw/ Afrikaan Ameerikaan, Isbaanish/Laatiino, Dhalad Hawaiiian/Jasiiradaha Baasifiga ah iyo Koonfur-bari Aasiya) iyo sidoo kale ardayga ka socda kooxaha taariikh ahaan laga diidey waxbarashada sare.*

“

**Waxaa jira jaaliyado yar-yar oo aad u badan oo jooga gudaha jaamacadda ah. Waxaan nasiib u yeeshay inaan si degdeg ah u helo kayga waxaana sabab u ah barnaamijyada ay bixiso UW, sidaas darteed waxaa joogay dad aan horay u aqaanay.**

”

Mahilet Abraha, '23  
Shoreline, WA  
Maareynta shaqaalaha  
iyo nidaamyada  
macluumaadka

UNIVERSITY of WASHINGTON

MULTICULTURAL OUTREACH & RECRUITMENT

Office of Minority Affairs & Diversity





# AAN KA DHIGNO MID MACQUUL AH

## LACAG AYAA SHAQAYSO

**BEEN:** Deeqaha waxbarasho waxaa loogu talagalay ardayda ugu sareysa iyo ciyaartoyda.

**XAQIIQ:** UW waxay soo dhawaynaysaa ardayda iyo ciyaartoyda ugu sareysa — laakiin waxaan haysanaa fursado deeq waxbarasho iyo deeqo loogu talagalay dhammaan ardayda.

**BEEN:** Dhigashada jaamacad macneheedu waa tiro badan oo deyn ah oo ardayga lagu yeesho.

**XAQIIQ:** Ardayda UW waxay ku qalin jabinayaan dayn ka yar tan dhexdhexaadka ah ee waddanka — iyo 63% ee kuwa dhigta UW waxay qalin jabiyaan iyada oo aan wax deyn badan lagu lahayn.

Bixinta kharashka jaamacadda waa inaysan kaaga bixin lacag aad u badan. Laga soo bilaabo deeqaha waxbarasho iyo deeqaha illaa jagooyinka waxbarasho-shaqo, waxaa jira fursado badan. La taliyayaasheena kaalmada maaliyadeed ayaa adiga iyo qoyskaaga kaa caawin doona inaad socodsiiisaan nidaamka, si aad u maalgeliso waxbarashadaada oo aadna uga qalin-jabiso adigoo deyn yar lagugu leeyahay

**\$400**

MILYAN

oo si sannadle  
ah loo bixinayo  
qaab kaalmo  
dhaqaale ahaan

**#1** JAAMACAD

Taasoo Inta  
Ugu Badan  
Faa'iido leh

(CNBC Make It)

**W**

## BALLANQAADKA HUSKY

Ballanqaadka Husky waa dammaanad qaadkeen ku aadan ardayda gobolka Washington: U ogolaan mayno caqabadaha maaliyadeed inay hor istaagaan helitaanka shahaadada UW. Haddii aad u qalanto Ballanqaadka Husky, waxbariddaada iyo khidmadahaaga si buuxda ayaa loo dabooli doonaa (taasi waa sax — si buuxda ayaa loo daboolayaa!) illaa afar sano. Sannad kasta, ku dhawaad 10,000 oo arday oo ka soo jeeda Washington ayaan UW ka bixinin wax khidmad ah, taas oo ay ugu wacan tahay Ballanqaadka Promise. Adigaba waad noqon kartaa qofkaas.

Wax badan ka oggooto halkan: [uw.edu/huskypromise](http://uw.edu/huskypromise)

Jordan Crawford (Kuskokwim), '21  
Black Diamond, WA  
Maareynta ganacsiga (suuq-geyn)



“

Waxaan ahaa qof hela deeqda waxbarasho ee Costco Diversity Scholarship oo ay weheliso Ballanqaadka Husky iyo deeqo badan. Barnaamijyadan waxay daboolen kharashka dhigashadayda UW – waa wax aan la qiyaasi karin anigoo ka soo jeeda qoys u halgamay sidii ay nolol-maalmeedkooda u dabooli lahaayeen.

”

UNIVERSITY OF WASHINGTON

MULTICULTURAL OUTREACH & RECRUITMENT  
Office of Minority Affairs & Diversity



# HEL QOYSKAAGA

## HALKEE KA TIRSAN TAHAY

UW ma ahan kaliya goob, waa qoys. Waxaad ka heli kartaa dadkaaga iyagoo ku jira in ka badan 1,000 naadi arday — laga bilaabo ururada dhaqanka illaa nolosha Giriiga, qaanso ku dagaallanka ilaa acapella. Wax kasta oo kiciya xiisahaaga, waxaa laga yaabaa inaad hesho kuwa kale oo kula wadaaga dareenkaaga.

## GURIGAAGA LABAAD

Jaamacadda UW waa bulsho — iyo gurigaaga oo ka fog guriga. Guud ahaan jaamacadda, waxaad ka heli doontaa goobo soo dhawayn leh, laga bilaabo hoolalka degaanka illaa Samuel E. Kelly Ethnic Cultural Center (xarunta dhaqanka kuleejka ee ugu weyn ee waddanka) iyo wətəbʔaltx<sup>w</sup> – Intellectual House, meel dhismo dhaqameed dheer oo ay iskugu yimaadaan ardayda Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska.

## BULSHADA KAA DAMBAYSA

Kaligaa ma ahaanaysid markaad joogto UW. Xataa ka hor inta aadan halkan iman, waxaad ku tiirsanaan kartaa la taliyayaal garanaya sida uu xaalka noqon lahaa haddii ay booskaaga joogi lahaayeen. Xafiiska Arrimaha Dadka Laga Tirada Badan yahay iyo Kala Duwananshiyaha iyo kooxda Wacyigelinta iyo Shaqaalaysiinta ee Dhaqamada Kala Duwan waxay ka shaqeeyaan si ay u abuuraan jaamacad kala duwan, loo wada dhan yahay oo qof kastaa ku guulaysan karo.

# W



## URURADA DHAQAMEED IYO ARDAYDA WAXAA KA MID AH:

Ururka Ardayda Madoow

Isbahaysiga Udoodida Ardayda Naafada ah

Ururka Ardayda Filibiinta Ameerikaanka ah

Kuwa Kanada ka soo jeeda ee UW

Ururka Ardayda Khmer

MEChA de UW

Isbahaysiga Ardayda Polynesian

Kooxda Purple

Isbahaysiga Dadka Khaniisiinta ee Midabka leh

... iyo kuwa kaloo badan!

“

**Waxaan ka walwalsanaa ogaanshaha in jaamacado badan ay u badan yihiin machadyo caddaan ah waxaanna dareemayey ka tirsanayn. Raaxada waxay ka timid garashada inaanan kali ahaan doonin, in ay jiraan barnaamijyo sida Xafiiska Arrimaha Dadka Laga Tirada Badan yahay iyo Kala Duwananshaha si loo taageero jiilka kowaad, ardayda aan la matalin.**

”



Ammara Touch, '21  
Kent, WA  
Daraasaadka Bayootajiga  
iyo qowmiyadaha  
Mareykanka


UNIVERSITY of WASHINGTON

MULTICULTURAL OUTREACH & RECRUITMENT

Office of Minority Affairs & Diversity



UNIVERSITY of WASHINGTON  
MULTICULTURAL OUTREACH & RECRUITMENT  
BOX #355845  
SEATTLE, WA 98195



FIRST LAST NAME  
ADDRESS LINE 1  
ADDRESS LINE 2  
CITY, STATE ZIP

